# Liiska hubinta tallalka ka hor ee tallalka COVID-19

## Loogu talagalay dadka qaadanayatallalka:

Magaca bukaanka ____________________

Da'da ____________________

Su'aalaha soo socda ayaa naga caawin doona go'aminta hadii ay jirto wax sabab ah oo kaa celineysa qaadashada tallalka COVID-19.

**Haddii aad 'Haa' Ku jawaabto su'aal micneheedu maaha inaadan tallal qaadanaynin.** Waxay un ka higan tahay su'aalo dheeraad ah ayaa lagu weydiin karaa.
Hadii ay jirto sua'aal aan addayn,fadlan weydii daryeel-bixiyahaaga caafimaad in uu kuu sharraxo.

| | Haa | Maya | Ma Ogi |
|---|---|---|---|
| **1.** Ma dareemeysaa wax xanuun ah maanta? | | | |
| **2.** Waligaa ma qaadatay tallalka COVID-19 ? | | | |
| • Haday haa tahay jawaabtaadu,tallal nocee ah ayaad qaadatay?<br>☐ Pfizer ☐ Moderna ☐ Janssen (Johnson & Johnson) ☐ Nooc kale ____________ | | | |
| **3.** Waligaa xasaasiyad ma ka qaaday:<br>(Waxaa ka mid noqon kara xasaasiyad daran[sida 'anaphylaxis'] oo u baahatay in lagu daaweyo epinephrine ama EpiPen® ama kugu kalliftay inaad aadid cisbitaalka. Waxaa ku jiri kara oo kale xasaasiyad timid 4 saacadood gudohooda oo sababtay finan,barar ama ciriiri xaga neefsashada ah oo ay ku jirto xiiqsasho.) | | | |
| • Qayb ka mid ah tallalka COVID-19 oo ay ku jiraan waxyaalaha soo socda midkood: | | | |
| ○ Polyethylene glycol (PEG), oo laga helo daawoyinka qaar, sidha kuwa caloosha jilciya iyo u diyaargarowga hababka baarista xiidmaha. | | | |
| ○ Polysorbate, oo laga helo tallalada qaarkood, kiniiniyada dahaarka leh, iyo steriodska xididada laga qaato. | | | |
| • Qiyaas hore oo tallalka COVID-19 ah. | | | |
| • Tallal ama daawo la isku duro oo ka kooban dhowr qeybood, mid ka mid ah qeybahaasna uu qayb ka yahay tallalka COVID-19,laakiin aan la ogeyn qaybta keentay xasaasiyada degdega ah. | | | |
| **4.** Waligaa xasaayiyad ma ka qaaday tallal kale (oo aan ka ahayn tallalka COVID-19 ) ama daawo la isku duro?<br>(Waxaa ka mid noqon kara xasaasiyad daran[sida 'anaphylaxis'] oo u baahatay in lagu daaweyo epinephrine ama EpiPen® ama kugu kalliftay inaad aadid cisbitaalka. Waxaa ku jiri kara oo kale xasaasiyad timid 4 saacadood gudohooda oo sababtay finan,barar ama ciriiri xaga neefsashada ah oo ay ku jirto xiiqsasho) | | | |
| **5.** Waligaa xasaasiyad daran (sida ' anaphylaxis') ma ka qaaday wax aan ka ahayn qayb ka mid ah tallalka COVID-19 , ama tallal kale ama daawo la isku duro ? Waxaa tan ka mid noqon kara cunto,xayawaan la korsado,sunta,deegaanka ,ama xasaasiyada daawoyinka afka laga qaato | | | |
| **6.** Ma heshay wax tallal ah 14-kii maalmood ee la soo dhaafay? | | | |
| **7.** Waligaa baaritaan caafimaad ka dib ma lagugu sheegay COVID-19 ama dakhtar waligaa ma ku | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| dhahay waxaad qabtaa COVID-19? | | | |
| **8.** Miyaad daawo ahaan u heshay daaweynta antibody-ga ee dadban (unugyada difaca jirka ee monoclonal ama unugyada dhiiga dadka ka bogsaday cudurka) ? | | | |
| **9.** Difaaca jirkaaga daciif ma yahay taasoo sabab u yahay infekshinka HIV ama kansar mise qaadataa daawoyinka hakiya difaaca jirka? | | | |
| **10.** Ma leedahay cillad dhiigbax ah mise qaadataa daawoyinka lidka ku ah xinjirowga dhiiga ? | | | |
| **11.** Uur ma leedahay mise waad naas nuujineysaa ? | | | |
| **12.** Ma qaadataa irbada lagu buuxiyo maqaarka? | | | |

**Foomka waxaa dib u eegay ______________________ Taarikhda______________**

03/15/2021 CS321629-E

Waxaa laga soo qaatay iyadoo eey qadarin la socoto liiska hubinta
ee immunization Action Coalition (IAC)